



December 23, 2023

Soo Dhawayn iyo Taageeris Go'aankii Issimada SSC-Khaatumo

Mudanayaal iyo Marwooyin,

Musharax Farah Aw-Osman wuxuu taageerayaa soona dhaweynayaa go'aankii geesinimada lahaa ee iyagoo midaysan ay wada qaateen Issimada dhaqanka ee reer SSC-Khaatumo. Go'aankaas oo aysan sahlanaayn qaadashadiisu marka la eego wadciyada amni, dhaqaale iyo awoodeed ee maamulka curdinka ah ee SSC-Khaatumo horyaal. Hadana, waxaan aaminsanahay in go'aankaasi uu ahaa mid aad loo gorfeeyay, looguna danaynayay wadajirka bulshada reer SSC-Khaatumo iyo xaqiijinta jiritaanka iyo madax-banaanida maamulka cusub ee SSC-Khaatumo.

Musharax Farah Aw-Osman wuxuu Bulshada Reer Puntland iyo musharaxiinta tartamayaba ku boorinayaa inay si niyadsami ah usoo dhaweeyaan go'aankaas, una diyaar garoobaan inay sii laba jibaaraan hiilkii iyo taageeradii walaalnimo ee aynu markasta la garab taagnayn walaalaheen reer SSC-Khaatumo.

Waxaan uga digaynaa Guddiga Xalinta Khilaafaadka Doorashada 2024-2029 iyo Maamulka xilka Puntland hayaba inaysan ku dhaqaaqin wax khilaafsan ama xagal daacinaya go'aankaas ay Issimada dhaqanka ee reer SSC-Khaatumo gaareen. Waa in doorashadu wakhtigeedii ku dhacdaa, maadaama 49-ka xubnood ee soo haray ay buuxin karaan Quorum kii looga baahnaa in shirarka baarlamaanku ku qabsoomaan waa in xiligaan kala guurka ah, xasaasigana ah aan la isku dayin in 17 kaas kursi ee banaanaaday la buuxin, balse lala sugo doorashada ka dib iyo wada tashi bulsho.

Waxaan musharaxiinta isbadal-doonka ah ugu baaqaynaa inay kulan degdeg ah isugu yimaadaan, si aan uga wada arinsano xaaladahaan cusub ee soo kordhay.

Waxaan bulshada reer SSC-Khaatumo u sheegaynaa, in Puntland tahay Khaatumo, Khaatumana tahay Puntland, waxay reer Puntland ka fishaana ay tahay taageero, garab iyo gaashaanba aan kala go iyo hagrasho lahayn.

Farah M. Aw-Osman

Mudane Farah Aw-Osman
Musharax, Xilka Madaxweyne ee Putland 2024-2029